

# Wargeyska Mountain View

## Oktoobar 5, 2016

Qamiis, Oktoobar 6.....Maalinta Sawirka Dugsiga  
Jimco, Oktoobar 7.....Shirka Golden Rule, Qolka Shirka Glendale, 10:00 a.m.  
Jimco, Oktoobar 7.....Guddiga Bulshada Dugsiga, Maktabka, 3:15 p.m.  
Talaado, Oktoobar 18.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC Qolka 183, 8:30 a.m.  
Qamiis, Oktoobar 20.....Ma Jiro Dugsi  
Jimco, Oktoobar 21.....Ma Jiro Dugsi  
Isniin, Oktoobar 24.....Ma Jiro Dugsi

### Fariinta Agaasimaha

Jimcahaan waxaan bilaabi doonaa fikradda dugsigena, oo ah, "Mountain View oo ku Dhaqanta Golden Rule (Sharciga Dahabiga)." Dhaqamo iyo diimo badan ayaa wadaaga fikradda in loo baahan yahay in aan dadka kale ula dhaqano isla si ama si ka wanaagsan sida aan rabno in dadka ay noola dhaqmaan, in aan dhowrno sharafta dadka, hantida, nafleyda, iyo dunida nafteeda. Si loo bilaabo fikradda, waxaan qaban doonaa shir maalinta Jimcaha, Oktoobar 7, qolka shirarka Dugsiga Dhexe Glendale, marka ay tahay 10:00 a.m., halkaas oo lagu soo bandhigi doono Project Golden Rule (Mashruuca Sharciga Dahabiga). Sannadkaan, waxaan kaloo qabnaa dhowr mashaariic oo ku saabsan fanka, oo taageeri doono fikradda. Inta sannadka socdo, waxaan la kulmi doonaa in badan oo ku saabsan fikradena bacdamaa la talliyehena dugsiga, kulliyadda iyo waalidiinta noo furan fursado si aan dhamaan u barano kuna celcelino in aan u dhaqano sida aan rabno in dadka kale ay noola dhaqmaan.

### Maalinta Sawirka Dugsiga

Ha iloobin in School Picture Day (Malinta Sawirka Dugsiga) la qaban doono Qamiista, Oktoobar 6. Foomamka dalabka waxaa loo diray guriga, waxaana loo soo dhiibay ardayda. Haddii foomka dalabka cunugaada uusan soo gaarin guriga, waxaad mid ka qaadan kartaa xafiiska ama waxaad ka dalban kartaa internetka. Si aad internetka uga dalbatid, tag [mylifetouch.com](http://mylifetouch.com). Aqoonsigena maalinta sawirka (ID) waa UM556192Q0. Maalintaan, looma baahna labbiska dugsiga, sidaas darteed caruurta waxay u soo labbisan karaan sawirada haddii ay doonaan.

### Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Oktoobar 18, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

## **Ma Jiro Dugsi Oktoobar 20-24**

Ma jiro dugsi laga bilaabo Oktoobar 20 ilaa Oktoobar 24, waa nasashada deyrta (fall), taasoo fursad u ah tababareyaasha in ay tagaan fasalada horumarinta aqoonta. Dugsi wuxuu bilaaban doonaa 7:55 maalinta Talaadada, Oktoobar 25.